

Dugsiga Dhexe ee Ockley Green wuxuu samaynayaa guddiga goobta horraanta 2017-ka.

Guddiga Goobtu waa koox wax danaysa oo matalaysa bulshada Dugsiga Dhexe ee Ockley Green. Xubnaha waxaa ka mid noqon doona Maamulaha, macallimiin (3), arday(2), waalid/dadka waaweyn ee wax daryeela (3) iyo xubin bulshada ka tirsan (1).

Mas'uuliyadaha Guddiga Goobta waxaa ka mid ah qabashada kulamo bil kasta la qabanayo si:

- Culayska loo saaro horumarinta guul gaaridda ardayga.
- Gacan loo siiyo qorshaha horumarinta dugsiga.
- Loo dhiirigeliyo ka qayb qaadashada qoyska iyo xiriirkka ka dhixeeeya dugsiga-guriga
- Loo eego horumarka ku aadan barnaamijka waxbarashada ee dugsiga.
- Loo taageero koritaanka xirfadeed ee shaqaalaha dugsiga.
- Loo taageero maamulida lacagaha deeqaha ah ee gargaarka ee loogu talagalay horumarinta xirfadeed ee shaqaalaha.

Iyadoo la isticmaalayo cilmi-baaris iyo wada shaqayn xog ku salaysan, Guddiga Goobtu way kulmi doontaa si wax looga qabto arrimaha, looga wada hadlo talooyinka la soo jeediyay, iyo si la raadiyo xalal loo dhan yahay.

Guddiga Goobta ee Dugsiga Dhexe ee Ockley Green waxay ka shaqeeyaan faa'iidada waxbarasho ee bulshada.

Waalidka/ma'suulka xubnaha ka ah Guddiga Goobta ee loogu talagalay Ockley Green ayaa la dooran doonaa si ay dugsiga ugu adeegaan muddo labo sano ah inta uu jiro ilme ay leeyihiin oo sanadahaasi dhigta dugsiga.

Jagooyinka saddexda waalid iyo halka xubin ee bulshada ka tirsan waxaa cod u qaadi doona bulshada OGMS.

Jagooyinka waalidku waxay noqon doonaan hal waalid oo ah fasalka 5naad, hal waalid oo ah fasalka 6xaad iyo hal waalid oo ah fasalka 7/8daad.

Haddii aad danaynayso ama garanayso qof danaynaya mid ka mid ah jagooyinkani, fadlan keen magaca iyo fasalka/booska xubinta bulshada ka tirsan adigoo email-ka hoosta ku qoran ugu soo diraya muddo aan ka dambayn Febraayo 15keeda:

jeffjpdx@gmail.com

Waad ku mahadsan tahay ka qayb qaadashadaada iyo taageeradaada!

René Canler
Maamulaha Dragon